



Kooxda IDG ee DMCC

120 Emarat Atrium Building, Sheikh Zayed Rd, PO Box 50784, Dubai, UAE

SIYAASADDA KA HORTAGGA MUSUQMAASUQA

Diseembar 2016

NOOCA 1





KOONTAROOKKA NOOCA

NOOCA	LA SOO SAARAY	MUALIF	WAXAA IN LA SHAACIYO AMRAY
1	AGOOSTO 16	G WINTER	I GORDON - SAXIIXA -
1	Siteembar 17	G Winter	<i>[Handwritten Signature]</i>



TUSMADA

TUSMADA	1
SIYAASADDA KA HORTAGGA MUSUQMAASUQA.....	2
1. Hordhac	2
2. Si guud	2
3. Shuruudaha Siyaasadda.....	2
4. Waxa ay tahay in la yeelo.....	4



SIYAASADDA KA HORTAGGA MUSUQMAASUQ

1. Hordhac

IDG wax dulqaad ah uma laha musuqmaasuqa.

Siyaasaddan waxay ka hadlaysaa arrimaha guud ee la dagaallanka musuqmaasuqa, si gaar ahna waxay uga hadlaysaa musuqmaasuqa la xidhiidha shaqaalaysiinta, xulashada iyo kala shaandheynta shaqaalahayaga. Waxaan ku tiirsan nahay tayada dadka si loo xaqiijiyo amniga iyo sumcadda iyo guusha Shirkadda. Waxaan sidoo kale ku tiirsan nahay shaqaalaha hadda jira inay naga caawiyaan inaan helno hawl-wadeenno cusub. Musuqmaasuqa ku jira shaqaalaysiinta waa mid aad u xun, IDG-na uma dulqaadan doonto in arintaas lagu dhex daro shaqada.

Anshaxa Shirkadeena (ama Kaida) waxaa tiir dhexaad u ah daacadnimo iyo sharaf, taas oo sidoo kale ah Kaida Gurkha dhab ah. Iyada oo la raacayo anshaxan Kaida, tani waxay noo sahleysaa inaan bixino xalalka amniga ee ugu tayada sarreeya si aan u daboolno baahida macaamiisha iyada oo ay ka go'an tahay bixinta shaqo aamin ah xirfadlayaal iyo khibrad hore oo Gurkha ah. Musuqmaasuqa iyo qaraabo kiilku gabi ahaanba waa wax aan la aqbali karin.

Shirkad ahaan waan diidnay inaan bixino ama aqbalno laaluushka noocuu doono ha noqdee. Haddii aad musuqmaasuq samayso ama aanad daacad ahayn laguguma soo dhaweynayo Shirkaddan, markii musuqmaasuqaaga ama khiyaamadaada la ogaadana, waan joojin doonnaa adeegyadaada. Haddii aad ilaaliso dhaqanka sharafta leh ee Gurkha ee runta ah, waxaan rajeyneynaa inaan ku siin karno xirfad dheer oo guuleysata Shirkadda dhexdeeda.

IDG uma dulqaadanayso musuqmaasuqa qandaraasleyda hoose ama wakiiladeeda waxayna u baahan tahay dhammaan xubnaha shaqaalaha inay hubiyaan in musuqmaasuqa aan lagu dhaqmin, loo dulqaadan karin ama loo ogolaanaynin inuu ka dhex dhaco dhammaan hawlaha IDG ay qabanayso.

2. Si guud

Dhammaan shaqooyinka la qabanayo waa in la fuliyo iyadoo la raacayo siyaasadda xeerka anshaxa ee IDG, xeerka anshaxa Ganacsiga iyo Dhaqanka ee IDC iyo Buug-gacmeedka Shaqaalaha ee IDG.

Dhammaan shaqaalaysiinta waa in loo raaco Nidaamka Qorista shaqaalaha ee IDG.

Dhammaan shaqaalaha (oo ay ku jiraan hawl-wadeenada qandaraaska qaatay ee aan laakiin la shaqaaleysiin) waxay akhriinayaan, fahmayaan oo saxeexayaan bayaanka anshaxa/xeerka anshaxa shaqsiyeed markay helaan qandaraaskooda shaqada.





3. Shuruudaha Siyaasadda

Si loo yareeyo khatar la xiriirta adeegsiga wakiillada, siyaasadda IDG waxay u baahan tahay innaga

- Diiwaangelinta baahi shaqo oo cad oo u muuqata wakiil kasta, oo leh sharraxaad ku saabsan sababta aan u adeegsaneyno wakiilka. Tan waa inuu markaa ogolaadaa Agaasimaha Maamulka.
- Diiwaangelinta kiiska lacag-bixinta la soo jeediyay tusaale kasta.
- In la sameeyo hore u socod taxaddar leh oo dhammaystiran si aan nafteenna ugu qancino in wakiilku u dhaqmayo si sharci ah oo waafaqsan shuruudaha looga faa'iidayanayo wakiilka.
- Wareysi fool-ka-fool ah lala yeesho wakiil kasta oo kuwa mustaqbalka ka mid ah.
- Inaad hesho warbixin taxaddar leh oo dibadda ah haddii ay jiraan wax su'aal ah oo ku saabsan dano iskhilaafaya oo u dhexeeya shaqaalaha gudaha ee hawsha fulinaya (tusaale ahaan waxay u istaagi karaan inay ku guuleystaan gunno sare haddii heshiiska la saxiixo).
- Maamulaha Maareynta waa inuu oggolaadaa oo uu saxeexaa soo-jeedin kasta.
- Hubi inuu jiro qandaraas la saxeexay (oo u baahan wakiilku inuu raaco siyaasadaha ladagaallanka musuqmaasuqa ee IDG iyo xeerka anshaxa una ogolaanaya IDG inay sameeyso hubin-xisaabeed iyo u hogaansanaanta hubinta) mudada ay tahay inaanay ka badnaan laba sano kahor shaqo kasta oo uu qabto wakiilku isagoo naga wakiil ah.
- Bixinta warbixin iyo sharraxaad, ballanta iyo xilliyada caadiga ah inta lagu jiro muddada qandaraaska ee siyaasadahayaga.
- Hubinta in si cad loo caddeeyo cidda lacagta laga bixin doono; kuwan waa in loo sameeyaa qofka / shirkadda aan qandaraaska la leenahay oo aan caadi ahaan lagu sameynin lacag kaash ah; waa inaan wax lacag ah lagu bixin xisaabaadka lambarada ah, ama dhinac saddexaad.
- Agaasimaha maamulku wuxuu kormeerayaa dhammaan xiriirada lala leeyahay wakiil kasta wuxuuna raadin doonaa warbixinno ku saabsan hawlaha joogtada ah ee ku saabsan sida wakiilku u qabanayo howlihiisa qandaraaska ee ka imaanaya Maamulaha Dalka ama Maamulaha Barnaamijka arrintu khuseyso.
- Haddii heshiiska qandaraaska la jabiyo, IDG ayaa joojin doonta dhammaan lacagaha la siiyo wakiilka waxaanay laali doontaa qandaraaska.
- In la hubiyo qodobbada ku jira heshiiska oo ay ka mid yihiin magdhow ka yimid wakiilka magdhowgaaa oo ka dhasha jabinta heshiiska qandaraas kasta oo wakiilku leeyahay, oo ay ku jiraan soo celinta dhammaan lacagihii horay loogu bixiyay heshiiska qandaraaska.



- Waxqabad kasta oo lala yeesho dhinacyada saddexaad oo IDG ay ku ogolaatay inay adeegsato qof saddexaad ama qandaraasle gaar ah si ay u siiso waxyaabo gaar ah oo ka mid ah adeegyada macaamiisha ku sugan gobolka gudahiisa waxaa loo tixgeliyaa heshiisyada wakaaladda ee ujeedooyinka kor ku xusan isla qodobadaasna waa in la raaca.

4. Waxa ay tahay in la yeelo

Xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha oo walaac ka qaba in siyaasaddan aan loo hoggaansamin waa inuu isla markaaba arrinta sheego. Waxaa lagu gudbinayaa Siyaasadda Sheegidda Wixii Dhib ah si aad hagitaan dheeraad ah u hesho.

